# Daryeelka Jeexa Qalliinka Neerfaha

**Neurosurgical Incision Care - Somali**

PAED-106

10-2025

## Qodobbada Muhiimka ah ee ku saabsan jeexa qalliinka neerfaha

- Dhaq gacmahaaga ama isticmaal gacmo nadiifiye ka hor intaadan daryeelin jeexa qalliinka.
- Ha fiirinin faashadda hoosteeda hana kafurin faashadda qalliinka ilaa uu ku faro daryeel bixiyahaada caafimaadka.

Macluumaadkan ayaa kaa caawin doona adiga iyo qoyskaadaba inaad daryeeshaan jeexa qalliinka marka aad guriga ku noqotid. Tani waa in loo isticmaalaa oo keliya hoggaan tixraac; Tilmaamaha bixiyahaada daryeelka caafimaadka ayaa ka mudan in marka hore la raaco.

Wac khadka Kalkaalisada (**651-229-3890**) haddii:

- Aad isku aragto calaamadaha caabuqa.
- Uu jeexa qalliinka dhinacyada u kala jiidmo ama furmo.

## Waa maxay calaamadaha caabuqa ee jeexa qalliinka neerfaha?

Jeexa qalliinka bogsoonaya ayaa laga yaabaa inuu u muuqdo casuus. Waa inaysan noqon mid caalidh leh ama gaduud saa'id ah. Hubso inaad isha ku hayso oo aad ka eegto calaamado kasta oo caabuq ah, oo ay ka mid yihiin:

- Gaduud, barar ama dheecaan.
- Jeexa qalliinka oo noqda kuleyl ama fardiir.
- Damqasho, Qanjidh barar kilkisha ah ama aagga gumeerka.
- Qandho sii socota.

## Sideen u daryeelaa faashadda jeexa qalliinka neerfaha?

- Haddii faashadaadu ay wasakh noqoto ama qoyan inta lagu jiro 48-da saacadood ee ugu horreeya qalliinka ka dib, wac khadka Kalkaalisada (**651-229-3890**).

- Faashadaha ku daboolan nabarka qalliinka waa in loo daayaa sidooda sida uu tilmaamay bixiyahaada daryeelka caafimaadka.
- sharootada Steri-Strip ayaa fiiqmi doonta oo ugu dambeynta maqaarkaada ka fuqi doonta. Haddii ay sharootada bilowdo inay cidhifyada kor usoo kacaan,  geesaha ka jar jar. Haddii sharootada Steri-Strip ay kasoo fuqdo oo jeexa qalliinka u muuqdo inuu weli u baahan yahay inuu bogsado, ku dhaji sharooto Steri-Strip ah oo cusub. Waxaa laga heli karaa dukaanka daawooyinka lagu iibiyo.
- Haddii jeexa qalliinka uu ku xoqmayo dharka, faashad ayaa la isticmaali karaa si loo ilaaliyo nabarka qalliinka.

## Sideen u qubeystaa anoo leh jeexa qalliinka neerfaha?

Nabarkaada qalliinka wuxuu u baahan yahay waqti si uu u bogsoodo ka hor inta aan la quusin ama lagu qooynin biyo.

### Meydhashada isbuunyada

Waad ku maydhan kartaa isbuunyo qoyan. Laakiin markaad jidhkaada dhaqeyso, xaqiiji inuu jeexa qalliinka ahaado qalleyl. Ha u oggolaan biyaha aad u isticmaaleyso in aad ku nadiifiso qeybaha kale ee jidhka inay taabtaan jeexa qalliinka inta aad ku meydhaneyso isbuunyada.

### Qubeyska

Waad qubeysan kartaa 48 saacadood ka dib qalliinka. Haddii weli faashadda saarantahay jeexa qalliinka kahor qubeyskaada koobaad, ha ka furin qubeyska ka hor. Laakiin, qubeyska ka dib, ka fur faashadda qoyan. Kadib, haddii bixiyahaada daryeelka caafimaadka uu kuu sheegay inaad xirnaato faashadda in ka badan 48 saacadood qalliinka ka dib, saar faashad cusub oo qalalan jeexa nabarka qalliinka.

### Qubeyska baafka

Ha ku dhex qubeysan baaf ay biyo ka buuxaan ugu yaraan 30 maalmood qalliinka ka dib, ama ilaa ceygariga nabarka qalliinka aan la arki karin - hadba kii dambeeya.

### Dabaasha / oogada biyaha

Ka fogow dhammaan oogooyinka biyaha (oo ay ku jiraan barkadaha, baafka biyaha kulul, badaha, webiyada, iyo harooyinka) ugu yaraan 30 maalmood qalliinka ka dib, ama ilaa ceygariga jeexa nabarka qalliinka aan la arki karin - hadba kii dambeeya. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad ka fogaato oogooyinka biyaha ilaa dhakhtarkaada uu yidhaahdo waa caadi in aad gasho.

## Sideen u yareeyaa astaanta nabarka ka dib qalliinka neerfaha?

Si loo yareeyo astaanta nabarka:

- Isku day inaadan u soo bandhigin jeexa qalliinnka qorraxda muddo sanad ah. Haddii aadan awoodin inaad is ka ilaaliso qorraxda, xiro funaanad cad oo isticmaal boomaatada qorraxda (sunscreen).
- Cun midhaha iyo khudradda iyo rootiga hadhuudhka dhemeystiran. Kordhi qaadashada fiitamiin C iyo barootiinka. Cab biyo badan iyo casiir. Nafaqo wanaagsan ayaa lagama maarmaan u ah bogsashada.

Macluumaadkan waxaa loogu talagalay ujeeddooyin waxbarasho oo keliya. Looguma talagalin in lagu beddelo talooyinka takhaatiirtaada daryeelka caafimaadka. Haddii aad wax su'aalo ah qabto, la hadal dhakhtarkaada ama kuwa kale ee ka tirsan kooxdaada daryeelka caafimaadka.

Haddii aad tahay bukaanka Gillette oo qabo su'aalo deg-deg ah ama walaac, fadlan la xiriir Khadka Kalkaalisada 651-229-3890.